



U adeegso shaxdan si aad ugu samaysato nidaamka xaadiriska elektorooniga ah adiga oo isticmaalaya macluumaadka isduwaangalinta iimeelka laguugu soo diray. Macluumaad dheeraad ah iyo sawiroba waxay ku jiraan waraaqaha lagu siiyay wakhtigii tabobarka iyo sidoo kale websaytka kaalmada.

Ku shub kombiyuutarkaaga KinderConnect si aad u maamusho xaadiriska

- Isduwaangali oo samayso meel Maamulaha Bixiyuhu ka galo.**
 - Qabo: <https://www.electronicattendancewa.com/kc>
 - Isduwaangali adiga oo adeegsanaya macluumaadka galitaanka iimeelka laguugu soo diray.
- Samayso PIN aad leedahay**
 - Riix **Operator>Search**, kadibna baadh magacaaga.
 - Riix **Account** (oo ku yaala qaybta midig fog ee magacaagu kujiro).
 - Abuur PIN shan god ah, riix sanduuqa duwaangashan haddii aanu marka horeba doornayn, kadibna riix **Save**.
- Xaqiiji oo ku dar carruurta**
 - Riix **Children>Search**. Kadibna riix badhanka **Search**.
 - Xaqiiji in carruurta kaabista qaadata in si sax ah loo qoray.
 - Ku dar carruurta kharashka gaarka looga bixiyo iyo jadwalladooda. Carruurta gaarka looga bixiyo waxaa loo baahan yahay in dhammaan waalidiinta, koriyayaasha, iwm loo oggolaaday ay galiyaan oo ay la socdaan.
- Ku dar Kafaale-qaadayaal**
 - Carruurta kaabista la siiyo waxay yeelanayaan hal kafaale-qaade oo nidaamka ku jira. Kafaale-qaadayaasha kale ee loo oggol yahay waa in gacanta laga galiyaa oo lala xidhiidhiyaa.
 - Carruurta gaarka looga bixiyo waxaa loo baahan yahay in dhammaan waalidiinta, koriyayaasha, iwm loo oggolaaday ay galiyaan oo ay la socdaan.
- Samaynta Hawlwadeenada kale**

Wixii daryeelka guriga ah waxaa kaliya loo baahan karaa hal Maamule Bixiye. Xarumuhu siday u badan tahay waxay yeelan doonaan Maamulayaal Bixiye badan iyo Icticmaalayaal Bixiye badan (caadiyan macallimiinta iyo kaaliyayaasha.)

 - Riix **Operator>Details**, kadibna **New**.
 - Gali magaca lagu isticmaalayo, baasweedhka, su'aasha sirta ah, iyo PIN-ka. Riix **Save**.

Taageero iyo Caawimo

<https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training>

La hadal **1-844-704-6777**

limeel eas.servicedesk@dcyf.wa.gov

Ku shub KinderSign taabletkaaga si aad carruurta u xaadiriso imaanshaha iyo bixista

Tallaabooyinkan waxay u diyaariyaan taabletka sidii loo isticmaali lahaa imaanshaha iyo bixista.

- Ku shub taabletkaaga oo **ku xidhiidhi Wi-Fi**.
- Soo deji, ku shub oo fur barnaamijka **KinderSign**.
- Kombiyuutarkaaga, ka gal KinderConnect oo riix **Report**, kadibna **Reports** liiska hoos uga furma. Dooro **KinderSign Tablet Registration Form** si aad u furto PDF-ka.
- Riix scan taabletkaaga oo ka sawir koodhka QR shaashadda kombiyuutarkaaga. Farriin ayaa soo bixi doonta sheegeysa in taabletka duwaangashan yahay.
- Ka dooro **Provider Mobile Sign-In Sheet** Reports liiska hoos u furma ee KinderConnect. **Fur, daabac** oo kudhaji waraaqaha gidaarkaaga meel aad ka sawiran karto aroor kasta.
- Sawir koodhka QR**. Liis ah dhammaan carruurta ku jirta daryeelkaaga ayaa soo bixi doona.



Ku shub KinderSmart taleefanka kafaale-qaadayaasha (waalidka/koriyaha) si uu u xaadiriyo imaanshaha iyo bixista carruurta

KinderSmart waa ikhtiyaar. Tallaabooyinkani waxay kafaale-qaadaha u diyaarinyaan inuu taleefankiisa isticmaalo si uu la socdo imaanshaha iyo bixista.

- Ka dalbo Kafaale-qaadaha inuu soo dejiyo, oo uu ku shubo kana furo barnaamijka **KinderSmart** taleefankiisa.
- KinderConnect-ka kombiyuutarkaaga, riix **Sponsors>Search**. Baadh kafaale-qaadaha, riix magacooda iyo foomka **Print KinderSmart Sponsor Registration**.
- Iyadoo uu pdf-ku ka furan yahay kombiyuutarkaaga ama daabacan yahay, ka dalbo in uu kafaale-qaaduhu ka furo barnaamijka taleefankiisa oo uu riix **Scan** oo **uu sawiro koodhka QR ee koowaad**. Farriin ayaa soo bixi doonta sheegeysa in lagu guulaystay duwaangalinta. Si aad u xaqiijiso, ka dalbo kafaale-qaadaha inuu **sawiro koodhka QR ee labaad** iyo inuu ku celceliyo xaadirinta imaanshaha/bixista. Kafaale-qaaduhu waxa uu kaa sawirayaa koodhka QR xaashida **Galitaanka Moobilka Bixiyaha** mar kasta oo uu ilmo xaadirinayo imaanshaha ama bixista.